Adan

4433667 or 4240075

**Republic Of Somaliland**
**Hargeisa Municipality**

DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA — D.H.H — HARGEISA LOCAL GOVERNMENT — HARGEISA MUNICIPALITY

**Jamhuuriyada Soomaaliland**
**Dawlada Hoose Ee Hargaysa**

## XARUNTA DEGMADA GACMO DHEERE

**XAFIISKA GUDOOMIYAHA DEGMADA**

**REF: -DGACM /XGD /086/ 2024** **Date: - 05/08/2024**

**Ku: Agaasimaha dhulka DHH.**

**Og: K/Xigeenka Duqa Caasimada Jsl**

**Og: Xoghayaha Fulinta DHH**

**Og: Duqa Caasimada Jsl**

# Ujeedo: - Warbixin

**Mudane,**

Anigoo tixraacaya codsiga ay soo codsadeen Baanka dhexe JSL kuna taariikhaysan **04/08/2024** ujeedadiisuna ay ahayd codsi gps sixid, hadaba goobtan waxaan udiray madaxa qorshaha Degmada waxaanu soo cadeeyay warbixintan hoos ku qoran:

(Gudoomiye fileka uu leeyahay Baanka Dhexe ee JSL oo tixraaciisu yahay **Tr-47208**, filekaasi oo ay isku dhaceen fileka tixraaciisu yahay **Tr-47773m**, filekaasi waxa soo diwaangashaday Baanka Dhexe JSL, waanuu u dhamaaday, waxaana hada lasoo siiyay Haayada Dukhsi Foundation, oo waxa soo siiyey madaxweynaha Qaranka JSL, Maamulka Baankuna way soo bixiyeen mulkiyadii si loo cancel gareeyo filekooda looguna sii daayo filekaasi haayada la siiyey.

Sidaas darted mudane , filekaasi waxa uu u baahan yahay in la cancel gareeyo, fileka tixraaciisu yahay **Tr-47208,** sidoo kalena lasii daayo fileka haayada Dukhsi Foundation si uu ugu dhamaado maadaama oo uu siiyey madaxwaynahu waxaana warbixintan soo hubiyay madaxa qorshaha degmada

Samir OK Sidaa uu ku taliyay Gudoomiyaha

**Alla Mahad Leh.**

**(Cismaan Aadan Maxamed)**

**Guddoomiyaha Degmada Gacma-Dheere Ee Hargeysa.**

GUDOOMIYAHA DEGMADA — D.H.H — GACMA DHEERE — HARGEISA SOMALILAND

5/8/24

**Email** /degmadagacmadheere@gmail.com **landline: 517685**

Republic Of Somaliland
Hargeisa Municipality

Jamhuuriyada Soomaaliland
Dawlada Hoose Ee Hargeysa

XARUNTA DEGMADA GACMO DHEERE

**XAFIISKA WAAXDA DHULKA DEGMADA**

**REF: -DGACM / 147/ 2024** **Date: 04/ 08/2024**

**Ku: Guddoomiyaha Degmada Gacma-dheere**

**Og: Aggaasimaha Waaxda Dhulka**

**Ujeeddo: Warbixin file**

Aniga oo tixraacaya amarka qalinka qoraalka ah ee ku taariikhaysan 04/08/2024 ujeedadiisuna ay tahay kasoo warbixin gps sixid, fileka uu leeyahay Baanka Dhexe ee JSL oo tixraaciisu yahay Tr-47208, filekaasi oo ay isku dhaceen fileka tixraaciisu yahay Tr-47773.

Hadaba gudoomiye, filekaasi waxa soo diwaangashaday Baanka Dhexe JSL, waanuu u dhamaaday, waxaana hada lasoo siiyay Haayada Dukhsi Foundation, oo waxa soo siiyey madaxweynaha Qaranka JSL, Maamulka Baankuna way soo bixiyeen mulkiyadii si loo cancel gareeyo filekooda looguna sii daayo filekaasi haayada la siiyey.

Sidaas darted gudoomiye, filekaasi waxa uu u baahan yahay in la cancel gareeyo, fileka tixraaciisu yahay Tr-47208, sidoo kalena lasii daayo fileka haayada Dukhsi Foundation si uu ugu dhamaado maadaama oo uu siiyey madaxwaynahu.

**Allah Mahad Leh**

04-08-2024

**Cabdikariim Cabdilaahi Ismaaciil**

**Madaxa Qorshaha Degmada Gacma-Dheere**

MADAXA QORSHAHA DEGMADA GACMADHEERE D.H.H HARGEISA LOCAL GOVERNMENT


GP-47207
TR-47773
GP-47208
135.33 m
GP-47201
Lane 43 Koodbuur-June Road
GP-47203
GP-47202
GP-47204
Lane 45 Koodbuur-June Road
GP-47209

MALILAND
UBLIC WORK
& HOUSING

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
DHULKA & GURYEYNTA

Minister Wasiirka الوزير

HG/DH&G/XW/ 117 /2024 Taariikh: 9 / 3 /2024

Ku: Duqa Caasimada Hargeysa **Hargeysa**
Og: Hay'adda Dukhsi Foundtion **Hargeysa**
Og: Agaasimaha Guud WHG/DH&G **Hargeysa**
Og: Wasiirku Xigeenka WHG/DH&G **Hargeysa**
Og: Madaxweynaha JSL **Hargeysa**

**Ujeeddo: Samayn Mulkiyada Lahaanshaha Guriga GMJ/A/101.**

Tixraac warqada sumaddeedu tahay Sum: **JSL/XM/WHGDH&G/236-1219/032024** kuna taariikhaysan **5/3/2024** kana soo baxday Xafiiska Madaxweynaha JSL, nuxurkeeduna ahaa ogolaansho hibeyn Guri **Lr. GMJ/A/101 Marxuun Axmed Ismaaciil Cabdi oo ah Mujaahidiintii dalka u soo Halgamay.**

Haddaba Mudane Maayir, aniga oo tixraacaya ogolaanshaha Madaxweynaha JSL ee kor ku xusan, waxaan kugu wargalineyaa in aad mulkiyada lahaanshaha u samayso **Hay'adda Dukhsi Foundtion Guriga** kor ku xusan.

Sidoo kale waxaan farayaa Agaasimaha Waaxda Guryaha ee WHG/DH&G inuu ka saaro diiwaanka dhexe ee Hantida Dawladda Guriga kor ku xusan.

**Alla Mahad Leh**

**Mustafe Maxamuud Cali (Godane)**

**Wasiirka WHG/DH & Guryeynta**

MINISTER — WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DHULKA IYO GURYEYNTA — MINISTRY OF PUBLIC WORK,LAND & HOUSING

3-4-2024

(1)

Ku: K/s/An dhulka

24/03/2024

To: Gudomiyaha Degmada C. Dhere.

02-04-2024

(2)

Ku: G. D. G/dheere

24/03/2024

…IYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sùm: JSL/XM/WHGDG/236-1219/032024

Taar: 05/03/2024

Ku: Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta Hargeysa

Og: Hay'adda Dukhsi Foundation Hargeysa

Ujeeddo: <u>Guriga GMJ/A/101</u>

Wasiir,

Tixraac qoraalkaaga sumaddiisu tahay WHG/DH&G/XW/83/2024, kuna taariikhaysan 13/02/24, ujeeddadiisu tahay soo-jeedin in Hay'adda Dukhsi Foundation loo hibeeyo Guriga Dawladda ee summaddiisu tahay GMJ/A/101, maadaama Marxuum Axmed Ismaaciil Cabdi uu ka mid ahaa mujaahidiintii dalka u soo halgamay.

Sidaa darteed, waxaan Guriga Dawladda ee summaddiisu tahay GMJ/A/101 u hibbeeyey Hay'adda Dukhsi Foundation.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# Jamhuuriyada Somaliland

**Ku: Gudoomiyaha Degmad Gacma Dheere** Date 4/08/2024

**UJ: codsi gps sixid**

**Mudane:**

**anigoo ah muwadinka magaciisu hoos ku xusan yahay waxaan cosanaya in la iisameyo gps sixid fileTRNO:47208**

**Sida daradeed waxan ka codsanaya gudomiye inad ii aqbashid codsigaygan**

**allaa mahadleh**

**Magaca**

**Guryaha bank dhexe JSL**

Xum, gorshaha

Kasoo warbixi gps sixidan

4/8/24